

Amarka L. 7 rep

Dhisidda Garsooraha Gobolka.

MAAMULKA WALAAYADA TALYAANIGA EE SOOMAALIYA

MAAMULUHU

Marka uu arkay Xeerka Madaxweynaha Jamhuuriyadda 9 Dicember 1953, lamba. 2353;
Marka uu garowsaday habboonaanta dammaand qaadka madaxbanaanida awoodaha garsoorka, in wax laga baddalay xeerka nidaamka garsoorka Soomaaliya ee lagu meelmariyay r.d 20 Juun 1935, lamba. 1638;

Marka uu arkay qod. 4 ee Bayaanka mabaadiidda Dastuuriga eek u lifaaqan Ilaalinta;

Marka uu arkay qod. 8 ee Heshiisha Ilaalinta;

Marka uu arkay qod. 4 ee Xeerka Madaxweynaha Jamhuuriyadda 9 Disember 1953;

WUXUU AMAR KU BIXINAYAA:

Qod. 1

Waxaa laga dhisay magaala-madax kasta ee gobol garsoore Maxkamad Gobol.

Qod. 2

Garsooraha gobolka waxa lagu magacabayaa Xeeruu soo saaro Maamulaha, marka uu dhagaysto talda garsooraha degmada. Isaga waxaa laga soo dhex xulanayaa garsoorayaasha. Marka uu maqanyahay garsoorahu waxaa loo magacaabi kara garsooryaal gobol saraakiisha ka tirsan Maamulka Wasaayadda ee Talyaaniga.

Qod. 3

Saraakiisha ka tirsan Maamulka Wasaayadda Soomaaliya ee Talyaaniga ee loo magacaabayoo garsooryaal gobol waa in ay haystaan Shahaada jaamaceed ee qaanuunka. Haddii tartan ka jiro sababa gaara xagga shaqada, waxaa loo dhiibi karaa xilka garsooraha gobolka xitaa saraakiisha ka tirsan Maamulka Wasaayadda Soomaalie ee Talyaaniga e haysta shahadada jaamacadeed ee dhaqaalaha iyo ganacsiga, culuunta siyaasadda iyo cuuunta siyaasadda iyo bulshada.

Qod. 4

Garsooraha gobolka waa mid madax bannaan. Sidaas daraadeed saraakiisha Maamulka Wasaayadda Soomaaliya ee Talyaaniga ee loo xilsaaray sida uu qabo qod. 2, in ay qabtaan xilka garsooraha gobolka, inta ay gudayaan xilka garsoorka, ma qaban karaan xil xafiis kale ee maamul.

Wakiilka Dadweynaha ayaa u xilsaaran ilaalinta xaafiisyada garsooraha gobolka

Qod. 5

Garsooraha gobolku wuxuu ku hawlgalyaa xudduduha xeerku u dejiyay, xilalka uu siinayo xeerka nidaamka garsoorka Soomaliya ee jira, heer degmo dambiyada ciqaabta, heer gobol wixii ku saabsan madani iyo ciqaab. Garsooraha gabolku wuxuu guddoomiyaa Maxkamadda Qaaliga wixii ku saabsan arrimaha ciqaabta, sida ku xusan cutubka koobaad ee qod 11 xeerka nidaamka garsoorka jira.

Xukunada garsooraha gobolka waxaa racfaan looga qaadan karaa marka la oggolyahayay garsooraha Soomaalida.

Garsooraha gobolka wuxuu kaloo qabanaya xilalka garsooraha ilaalinta (tutelare).

Qod. 6

Waxba iskama baddalin arrimaha ku saabsan tirada iyo xilalaka garsooraha gobolka ee ku qod 17 iyo xeerka nidaamka garsoorka jira.

Qod. 7

Wakiilka Dadweyne u Doodaha wuxuu wakiilan karaa, sida ku cad qod 34 ee xeerka nidaamka garsoorka jira, arrimaha ku saabsan baarista dacwadaha ee laga soo qabanayo meel ka baxsan saldhiggiisa, garsoorayasha gobollada.

Goobaha aanu saldhig ku lahayn garsooraha gobolka, isla maraana ayjiraan sababa gaara ee deg-degga, wakiilka Dadweyne u Doodaha wuxuu qaraar sababaysan ku wakiilan karaa xitaa dadka deegaanka.

Qod. 8

Haddii garsooraha gobolka uu maqanyahay ama ay jiraan wax ka horjoogsanaya shaqada, Maamulku wuxuu Xeerugu yeeri karaa in uu baddalo garsooraha ugu dhow, ama ku-sime garsoore Soomaaliyeed, ama sarkaal kale oo la magacaabo si wafaqasan qod. 2.

Qod. 9

Xaafiis kasta ee garsoore gobol waxaa ka hawlgalya kaaliye iy gaarsiiye. Xilka Kaaliyaha iyo gaarsiiyaha hal qof ayaa isku qaban kara,

Qod. 10

Garsooraha gobolka ayaa u xilsaaraan fulinta xukunada iyo qaraar kasta oo looga dhawaaqo dacwadaha ciqaabta ee ay iqtisaaska u leeyihiin.

Guddoomiyaha Degmada wuxuu fuliyaa xukunada Qaaliga darajada koobbad ee awoodda fulinta leh.

Qod. 11

Awoodda garsooraha ilaalinta ee ku xusan qod.119 Xeeke Nidaamka Garsoorka ee la siiyay guddoomiyaha gobolka iyo degmada, waxaa qabanaya garsooraha gobolka.

Qod. 12

Cabashoyinka la soo gudbiyo si waafaaqsan qod. 640 Xeerka habka Ciqaabta Talyaaniga ee laga keeno dekereetda uu ku dhawaaqo garsooraha gobolka isago ah garsooraha ilaalinta, waxaa go'aan ka gaaraya garsoore Soomaaliyeed.

Xeerka uu ku dhawaaqo garsooraha Soomaalida wax cabasha ha kama furna.

Qod. 13

Xeer kasta oo ka soo horjeeda Amarkaan waa la tirtiray.

Qod. 14

Amarkaan wuxuu dhaqangalayaa 1 Juulay 1953.

Muqdisho, 22 Maajo 1953.

Maamulaha
E. Martino

Waan arka — la Duiwaagaliaya — Diw. lamba. 221, R. D
3 Juun 1953.